Book name

THE 48 LOWS OF POWER

Xeerarka Awooda – 48 Laws of Power, by Robert Greene.

Tarjumay. Ali Mohamed Karar

Xeerka 1aad:

Haka muuq-dheeraan masuulkaga. [Never outshine your master].

~ Si aad u hanato awood ama aad u ilaashato maamuus aad laheyd, marna haka hoos bixin hadhka qofka ku xukuma. Dadaalkaga, kartidaada iyo shaqo wanaagagu macno sameyn maayaan hadii uu ku kuburiyo masuulkaga, noqo dantii garad madaxa foorarsha.

Xeerka 2aad:

Aaminidaada oo dhan ha isku geyn saaxiibadaa, baro sida loo adeegsado cadawgaada. [Never put too much trust in friends, learn how to use enemies].

~ Saaxibada marmarka qaar ka feejignow waayoo way kaa maseyri karaan si sahlana way kuu hungoobin karaan, dhanka kale cadowgaada waxba kuma qarinayaan; waad ogtahay inay ku neceb yihiin, baro sida loogu xamaasho. Cadawgaadi hore ayaa noqdo saaxiibka ugu wanaagsan.

Xeerka 3aad:

Cidna hala wadaagin waxaad maagan tahay. [Conceal your intentions].

~ Hadii aad sii shaaciso waxaad ku dagaal gali laheyd waxaad bixisay fursad lagaga sii gaashaanto, kadi cidda aad is-haysaan. Mowqifkaaga ha cadeynin, ha noqon mid la heli karo.

Xeerka 4aad:

Hadii aysan laga maarmaan aheyn aamusnow. [Always say less than necessary].

~ Hadii aad daldalanto; aakhirkii waxaad tahay mid ku hadlo wax aan xigmad ku fadhiyin oo ku qiima tira, ogsoonow libaaxa aamusan ayaa ka halisan midka qayliya.

Xeerka 5aad:

Sharaftaada dhowro. [So much depends on your reputation, gaurd it with your life].

~ Sharaftu waa seeska awooda, intaysan sharaftaadu dhiman cid kasta waad maamuli karta; balse markaad sibxato ogsoonow inaad nuglaan doontaa. Waa sababta ay siyaasiyiintu uga cabsoodaan saxaafada; markastana ay u raadiyaan inay bulshada sumcad ku dhex lahaadaan.

Xeerka 6aad:

Qiimo kasta u hur inaad soo jiidato dareenka mushtamaca. [Court attention at all cost].

~ Jid kasta umar inay isha dadku ku qabato oo aan caanimo & shacbiyad lagaga horeyn. Baabuur (V8), saacado, labis iyo hab-dhaqan qaaliya lahow; waxaad u ekaan doonta mid awood leh oo la xushmeeyo.

Xeerka 7aad:

Shaqada ha lagu qabto, libintana adigu yeelo. [Get others to do the work for you, but always take the credit].

~ Ha noqon mid isku dayo inuu qabto shaqo kasta, ku shaqee oo ku caano maal dhididka & dheecaanka kuwo leh aqoontii & waayo-aragnimadii ku habooneyd hawshaas, hubi na inaad ugu dambeyn libinta adigu sheegato.

Xeerka 8aad:

Dadku ha noqdaan kuwo kugu soo carara, kol aad dabin kuso xero galiso. [Make other people come to you, use bait if necessary].

~ Hadii aad sugto inta qof kale talaabada koobaad qaadayo; waxaad noqon doonta mid fashilma, hubi inuu adiga dhankaaga kuso hirto oo uu noqdo qofka marka hore falceliya, hadaad rabto laaluush, xodxodo ama adeegso tab kasto oo aad kuso dabi karto, kadib dheeliga ka lumi oo ka weerar meel uu ka fileyn.

Xeerka 9aad:

Guushaada ku xaqiijii ficil, maya muran. [Win through your actions, never through argument].

~ Hadii aad dooneyso inaad muujiso awoodaada, noqo mid guulihiisa ku muujiyo ficil iyo talaabooyin muuqda, nacas ayaa ku hodma guul lagu gaadho muran & hadal.

Xeerka 10aad:

Ka dheerow kuwo murugaysan ee nasiibka xun – waa xanuun la isqabadsiiyo. [Infection: Avoid the unhappy and unlucky].

~ Masiibada & murugadu wehel ayay jeceshahay, ka dheerow kuwo la saaxiibka ah.

Xeerka 11aad:

Baro sida dadka loga dhigo kuwo kugu tiirsan. [Learn to keep people dependant on you].

~ Xeerkan waa mid burburiya tartanka intuusan noqon mid halis ah. Hadii aad ogolaato inay dadka ka madax banaanadan, aakhirkii waa kuwo kaa kaaftooma. Hadii aad dooneyso awood dhameystiran; waa qasab inay dadku adiga kugu tiirsanadaan. Xoriyadaada iyo awoodaadu waxay ku xirnaan doonta cadadka dadka adiga kugu xiran.

Xeerka 12aad:

Adeegso daacadnimo & deeqsinimo xadidan si aad hubka uga dhigto dhibanahaaga. [Use selective honesty and generosity to disarm your victum].

~ Dadku badana waa kuwo iska walwalsan, ku aamini maayaan; hadii aad markasta u muuqato qof daneyste ah oo xakamaha jecel; sidaas awaaded muuji wax yaro daacadnimo ah si aad hubka uga dhigto dhibanahaaga.

Xeerka 13aad:

Markaad axsaan dalbaneyso, dadka uso bandhig wax ay dani ugu jirto, maya naxariis iyo mahadnaq. [When asking for help, appeal to people's interest. Never their mercy or gratitude].

~ Hadii aad rabto in qof uu ku caawiyo, usoo bandhig sabab daneysi oo ku kalifta, dadku way ilowshiiyo dhaw yihiin; dana kama laha hadii aad horey u caawisay ama aad u aheyd mid u naxariis badan. Balse hadii aad uso bandhigto dalab ah inay lacag & faa'iido ka sameyn doonaan hadii ay hawl ku qabtaan; markaas si xamaasad ku dheehan ayay ku caawin doonaan. Qofna haka sugin mahadnaq iyo naxariis.

Xeerka 14aad:

Ugu muuqo sidii saaxiib balse ula dhaqan sidii naaquude. [Pose as a friend, work as a spy].

~ Dadka la saaxiib, xasilooni hakugu ag dareemaan, u sahal inay si kal iyo laaba kula sheekeystaan, kadibna la wadaag waydiimo dadban oo siraha uqarsoon kaso saara. Sidaas na ku ogow meelaha ay ka nugul yihiin iyo cabsiyaha ay la nool yihiin. Si aad dadka awood ugu maquuniso waxaad u baahnaan doontaa inaad faro ka hayso.

Xeerka 15aad:

Gabi ahaanba ka takhalus cadawgaada. [Crush your enemy totally].

~ Hadii aad cadawgaada dhaawac tiri weydo, wuu kugu soo kabsan doonaa; wuuna kaa aarsan doonaa.

Xeerka 16aad:

Maqnaanshahaga u adeegso si aad hesho xushmad & sharaf. [Use absence to increase respect and honor].

~ Qiimo isugu yeel maqnaantaada. Hadii aad noqoto qof markasta la heli karo; markaas dadka damaanad ayaad u siisay inaan lagu tabin.

Xeerka 17aad:

Ku xanib xaalad argagax leh: abuur jawi aan la saadaalin karin. [Keep others in suspended terror: cultivate an air of unpredictability].

~ Baniaadanku waa makhluuq jecel caadada/dhaqanka joogtada ah iyo in ficilada qofku noqdaan kuwo la aqoonsan karo, hadii aad tahay mid la saadaalin karo; markaas waxaad bixisay fursad xasilooni iyo deganaansho. Miiska daba gadi, si ula kaca u noqo mid aan la saadaalin karin. Dhaqanadaada aan joogtada aheyn waxay ka dhigi doonta kuwo lumiya dheeliga; waqti ayay galin doonaan si ay u fahmaan talaabada xigta ee aad qaadeyso; xeeladan hadii aad ku fuliso waxay ka dhigi doonta kuwo cabsi iyo argagax laso daristo.

Xeerka 18aad:

Ha dhisanin qalcado si aad isku difaacdo – Isgo'doomintu waa khatar. [Do not build fortresses to protect yourself – Isolation is dangerous].

~ Dunidu waa mid khataro badan, qof kasta khataro ugaara ayuu la tacaalaya, inkastoo in dhufeys la galo ay u muuqato badbaado; hadana wax ka halis badan ma jirto inaad is go'doomiso; waxaad noqotaa mid waaya xogo muhiim ah, mid si sahlan loo bartilmaameysan karo. Dadkaaga ku dhex jir, markastood aad ugu sii dhex milanto dadka waxay ka dhigan tahay inay sii yaaraneyso fursada lagaga guuleysan karo.

Xeerka 19aad:

Ogow qofka aad la tacaaleyso – haku xadgudbin qof kale. [Know who you're dealing with – Do not offend the wrong person].

~ Banidaadanku waa kala abuuris, macquulna maaha in dadku xeeladaahaga isku si uga falceliyaan. Qof aysan waxba idinka dhaxeyn ayaad ku xadgudubtay; sidaas na waxaad ku sameysatay cadaw horleh oo inta noloshiisa ka dhiman waqtigiisa galiya siduu kaga aarsan lahaa. Sidoo kale haku qaldamin qof kaa awood badan.

Xeerka 20aad:

Qofna ha is-wada-siin. [Do not commit to anyone].

~ Qofka nacaska ayaa ku dagdaga inu dhan la safto ama cid gaar isku dhiibo. Marna ha is-wada-siin Qadiyad gooniya ama qof gaara oo aan ka aheyn naftaada, u muuqo mid aan dhan u xaglin oo dhexdhexaad ah; markaas waxaad noqon doonta mid awood badan.

Xeerka 21aad:

Matal qof la khiyaami karo si aad u hesho khiyaanoolaha – umuuqo mid ka doqonsan bartilmaamedkada.

[Play a sucker to catch a sucker – seem dumber than your mark].

~ Qofna ma jeclo inuu ka doqonsanaado qofka ay is-hayaan; sirtu waa in dhibanahaagu is moodo xariif, waliba mid adiga kaa xariifsan. Markuu intaas aamino, kama shakin doono inaad wadato ujeedooyin qarsoon.

Xeerka 22aad:

Adeegso xeelada is-dhiibida: daciifnimada awood ubadal. [Use the surrender tactic: transform weakness into power].

~ Markii ay kaa jajaban tahay dagaalka hasii wadin bal'e isdhiib, isdhiibidu waxay ku siin doontaa waqti aad kuso kabato. Ka takhalus qabkaaga oo isdhiib markan; si aad u khalkhaliso cida aad is-haysaan.

Xeerka 23aad:

Xooga saar awoodahaaga. [Concentrate your forces].

~ Awoodada iyo tamartaada oo dhan iskugu gee hawsha ama qofka aad sida gaarka ah urabto inaad wax ka qabato – yuusan dagaalku kaa baahin.

Xeerka 24aad:

Noqo qofka daaha gadaashiisa wax ka maamula. [Play the perfect courtier].

~ Noqo la taliye sare ee qof awood badan, kadibna daaha gadaashiisa wax ka maamul oo si xariiftinimo leh u adeegso awoodaas. Hana is muujin oo cidna dakano haka galin.

Xeerka 25aad:

Dib-ucuro. [Recreate yourself].

~ Ha aqbalin doorka ay bulshadu ku siiso, dib-ucuro oo noqo qofka aad rabto inaad noqoto, marka aad doonto isbadal. Dunidu waa masrax; adigu xulo doorka aad rabto inaad matasho.

Xeerka 26aad:

Gacmuhu nadiif haku ahaadaan. [Keep your hands clean].

~ Maxaa gacmaha kaa wasakhaynaya adigoo heli kara mid shaqada wasakhaysan oo dhan aad ku qabsato, ugu dambeyna dambiga oo idil aad u xambaariso.

Xeerka 27aad:

Ka faa'iideyso rabitaabka dadka ee ah in wax uun la iska rumeeyo – oo noqo mid lagu daba faylo. [Play on people's need to believe to create a cult like following].

~ Dadku waxay leeyihiin rabitaan xad dhaafa oo ah inay wax uun iska rumeystaan, noqo qofkii lagu daba fayli lahaa oo rabitaankaas daboola islamarkaana curiya qadiyad la wada ilaashado.

Xeerka 28aad:

Hawl kasta ku qabo dhiiranaan. [Enter action with boldness].

~ Ha noqon mid labaclabac ah oo bilaa kalsooni ah. Hadii aad tahay mid qajilaad badan oo cabsada; waxaad ku dambeyn mid la burburiyo. Xaalad kasta ku wajah dhiiranaan iyo geesinimo.

Xeerka 29aad:

Qorshe dhameystiran yeelo. [Plan all the way to the end].

~ Qorshahaagu ha noqdo mid ilaa gabgabada shaqeeya, ku xisaabtan caqabadaha soo bixi kara, fursadaha, isbadalada.. ha ogaalinin inay guusha kugu seegto qorshe xume.

Xeerka 30aad:

Guulahaaga ha umuuqdaan kuwo aad dadaal la'aan ku gaadhay. [Make your accomplishments seem effortless].

~ Waxqabadkaadu ha muuqdo waxaad si sahlan ku qabatay oo aad karti u leedahay, xeeladaha aad adeegsato waa inay sir kuu ahaadaan, u muuqo madaale iyo isma dhibe. Ka feejignow inaad dadka la wadaagto rafaadka iyo silaca aad u martay guulahaaga; waxay abuuri doonaan su'aal iyo tuhun laga keeno kartidaada iyo awoodaada.

Xeerka 31aad:

Xakamaha uqabo doorshada la haysto: dheesha adigu maamul. [Control the options: get others to play with the cards you deal].

~ Khiyaano ka weyn ma jirto markay moodayaan inay doorasho haystaan, balse xaqiiqadu ay tahay inay kala dooranayaan doorasho ad adigu kaso shaqeysay – laba daran mid ha doorto dhibanahaagu.

Xeerka 32aad:

Ka faa'iideyso hawada/fantasiyada dadka. [Play to people's fantasies].

~ U abuur dadka hawo/fantasiyo soo jiidata khiyaalkooda; deedna sidaas ku xakamee.

Xeerka 33aad:

Ogow meesha uu qof walba ka jilcan yahay. [Discover each man's thumbscrew].

~ Waxaa laga yaabaa inuu qofku dabci u leeyahay baqdin, inay baahi gaara hayso, ama inuusan xakameyn karin shucuurtiisa, ama sir gaara uu ku nafiso – ogow halkaas uu ka jilcan yahay dabadeedna qaab ku anfacaya uga faa'iideyso.

Xeerka 34aad:

Yeelo habdhaqan boqortooyo: Isku matal boqor si lagula dhaqmo inaad tahay boqor. [Be royal in your own fashion: act like aking to be treated like one].

~ Ugu dambeyn sida aad iska dhigto ayaa lagula dhaqmi, qof caadiya ayaad noqotay; markaas cidna kaa haybeysan mayso.

Xeerka 35aad:

Noqo macalinka ku xeeldheer kaadsiinyaha. [Master the art of timing].

~ Ha umuuqan qof degdegsan markasta; waxay la macno noqon in xakamuhu kaa lunsan yahay. Deganaan muuji.

Xeerka 36aad:

Iska indhotir waxaadan heli karin: inaad xaqirtaa waa aargosiga ugu fiican. [Disdain things you cannot have: ignoring them is the best revenge].

~ Cadawgaadu wuxuu xoogeystaa marka aad qiimo u yeesho.

Xeerka 37aad:

Usamee muuqaal cajiiba oo ay qasab ugu riyaaqaan. [Create compelling spectacles].

~ Hiyikici oo ka indhasircaad waxaad maagan tahay.

Xeerka 38aad:

U fikir sida aad jeceshahay balse udhaqan sida dadka kale. [Think as you like but behave like others].

~ Hadii aad u dhaqanto qaab dadka ka duwan, waxaa iman in laga maseyro ama lagu naco sidaas na aad cadaw ku sameysato. Dadkaaga ku dhex jir oo ha iska soocin.

Xeerka 39aad:

Biyaha laaq/kici; si aad kaluunka dibada ugu soo saarto. [Stir up waters to catch fish].

~ Maxaa ka wanaagsan markaad taqaan waxa cadawgaada ka xanaajiye – kadibna aad ka faa'iideysato iimahooda. Noqo mid markasta xasiloon oo degan, dhanka kalena cadawgiisa ka lumiya dheeliga.

Xeerka 40aad:

Iska diid waxa bilaash lagugu siiyo. [Despise the free lunch].

~ Ma jiraan wax bilaash lagu isku siiyo; badana khiyaano ama ujeedo qarsoon ayaa laga leeyahay: ka feejignow wax kastoo bilaash lagugu soo bandhigo.

Xeerka 41aad:

Ka fogow inad ku ag muuq-beesho qof caan ah. [Avoid stepping into agreat man'a shoes].

~ Hadii aad qof magac leh ku hoos jirto; waxaad noqon mid ku hoos luma hadhkiisa. Sameyso jid adiga ku gaara oo ka tag dhaxal lagugu xasuusto.

Xeerka 42aad:

Ari-jirka weerar; arigu isaga kala carari'e.[Srike the sheepherd and the the sheep will scatter].

~ Hal qof ayuu badanaa kusoo dhamaada raadka caqabadnimada, baadh, ogow kadibna iska qabo – hala xaajoonin ee ciqaab ama iska sooc, hadii kale kuwo kale ayuu duufsan.

Xeerka 43aad:

Ka qabso maankooda & qalbigooda. [Work on the hearts and minds of others].

~ Hadii aad dadka qasabto aakhirkii waxay abuurta falcelin ah inay kula dagaalaan. Noqo mid kasbada oo shukaansada. Qofka aad tashkiiliso wuxuu noqdaa mid daacad kuu ah oo jihadaada usocda. Qaabka ugu sahlan ee qof loo tashkiiliyaana waa inaad ka duushaa sida qalbigiisa iyo maankiisu u sameysan yahay.

Xeerka 44aad:

Hubka kaga dhig oo kaga xanaaji inaad canjisho. [Disarm and infuriate with the mirror effect].

~ Markaad canjisho cadawgaada, ma ogaan doonaan khidadaha rasmiga ee kuu qarsoon.

Xeerka 45aad:

Ku wacdi in isbadal loo baahan yahay laakiin halmar ha sameynin isbadal balaaran. [Preach the need for change, but never reform too much at once].

~ Qofkasta way ka dhaadhacsan tahay in isbadal la sameeyo laakiin xaqiiqatan dadku waa kuwo u abuuran inay ka helaan waxa joogtada/caadada ah, way sanifaan wax cusub iyo isbadalka – waxeyna ku wajahaan kacdoon. Hadii aad tahay hogaamiye cusub ama mid raba inuu ilaashado ama dhisto awood iyo maamuus; noqo mid xurmeeya caadooyinkii iyo dhaqanadii horey usii jiray.

Xeerka 46aad:

Ha uu muuqan mid dhameystiran. [Never appear too perfect].

~ Inaad u muuqataa mid kaamil ah waa khatar, waliba waxay usii daran tahay marka lagu arko inaadan laheyn wax jileec ama nugeyl ah. Maseyrku wuxuu kuu abuuraa cadow qarsoon. Si aad uga xijaabato maseyrka, ugunua muuqato qof caadiya oo la wajihi karo; waxaa haboon inaad marmarka qaar muujiso nugeyl iyo inaad tahay qof jilcan oon dhameystirneyn.

Xeerka 47aad:

Ha dhaafin halkii aad calaamadsatay. [Do not go past the mark you aimed for].

~ ha dhaafin halkii aad hiigsaneysay – baro marka la rabo inaad joogsato. Kibirka iyo kalsoonida xad-dhaafka ah waxay ku dhaafiyaan halkii aad hiigsaneysay, markasta oo aad halkaas dhaaftana waxaad sii abuurataa cadaw horleh adigoo damacsanaa inaad kuwo ka takhalusto. Guushu yaysan ku madax marin, qorshe iyo istaraatejiyada dajiso, marka aad gaadhana joogso.

Xeerka 48aad:

Noqo mid bilaa qaab ah. [Assume formlessness].

~ Noqo bilaa qaab sida biyaha. Inaad yeelata qorshe muuqda; waxay ka dhigan tahay inaad isku furtay in cadawgaadu kuso weeraro. Iska dhig mid furan oo aan laheyn meel logu soo hagaago.